"Plato oo ahaa nin fiilosafar ah ayaa wuxuu yiri bulsho waxay karaankeeda beertaa waxay sharaf ku kasban karto. Ee yeynaan ka habaabin wixii sharaf mudan. Haddii calaamdahaani ay ahaayeen kuwo la fahmikarayey, waan fahmi karaa waana isfahamsiin karaa."

-Max DePree, Hogaamintu waa Farsamo

SOO JEEDINTA HAB MAAMUUSKA ARDAYDA IYO SHAHAADO SHARAFTA

Qorshaha xushmada Soo Jeedinta Hab Maamuuska Ardayda iyo Shahaado Sharafta ayaa waxaa sameeyey maamulayaasha iyo shaqaalaha todabada dugsi ee sare ee St. Paul si loo gaaro labadada hadaf ee kala ah: (1) in la dhiiri galiyo arday badan si ay u qaataan barnaamijyo aad u adag oo waxbarashada diirada saaraya iyo (2) in la dhiiri galiyo iyo in la xoojiyo in macalimiintu ay maadooyinka ugu adag dugsiyada sare oo dhan ka dhigaan.

Qorshaha Xushmada iyo Sharfida ardaydu wuxuu ka koobanyahay laba qaybood: qaybta cusub ee shahaado sharafta lagu qalinjabiyo iyo in ardayda xarfaanta ah gooni loo qoro. Hadaba haddii mid ka mid ah ardayda ka qalanjabinaya dugsiga sare uu/ay qalmaan mid ka mid ah labadaan mustawe ama labadaba waxaa sidaas ama arintaas lagu cadayndoonaa oo lagu qoridoonaa nuqulka maadooyinka iyo dhibcaha loo qorayo marka ay dugsiga dhamaystaan. tusaale ahaan nuqulka dhibcaha ama buundooyinka maadooyinka waa in lagu qoraa:

> *Ardaygaani wuxuu ku Qalinjabiyey Shahaado Sharaf (Wadarta guud ee dhibcuhu waa 3. 83)*
>
> *Wuxuu Maamuus ku Mutaystay Xisaabaadka*

Haddii ay ogolaadaan Gudiga Kormeerka waxbarashada ee St. Paul meelmarinta mudnaanshaha xushmada iyo maamuuska ee ardaydu wuxuu la bilaabandoonaa Fasalada sanadka 2008 ardaydaasoo dugsiyada bilaabi doona xiliyada dayrta ee sanadka 2004. inta ka horaysa tixgalinta ay gudoonka waxbarashadu arintaan siindoonaan, shaqaalaha degmada iyo maamulayaasha dugsiyada sare waxay arinta ku sii samayndoonaan baaritaan qoto dheer oo ay ku ururinayaan xog kasta oo la helikaro

Faahfaahinta Qaybaha Shahaado Sharafta Qalinjabinta ee Cusub

- Ulajeedada: Ujeedada arintaani waxaa weeye in ardayda dugsiyada sare ka soo qalinjabinaya loo aqoonsado guusha ay ka soo hooyiyaan dhamaan maadooyinka ay qaataan wakhtiga lagu jiro inta ay dugsiga sare ku jiraan fasalada 9-12
- Ardaydu markay soo qalinjabinayso waxay qaadan karaan mid ahaan labadaan aqoonsi:

  Shahaado Sharaf Sare: Waxaa darajadaan ardayga loo aqoonsan doonaa marka uu wadarta guud ee dhibcuha oo laysku geeyey gaarayso 3.75 ama wixii ka

sareeya iyo in ardaygu uu dhamaystirto laba sano oo barashada luuqadaha aduunka ah ama inuu si hufan qoraal iyo hadalba u isticmaali karo luuqadahaas.

Shahaado Sharaf: Waxaa darajadaan ardayga loo aqoonsan doonaa marka uu wadarta guud ee dhibcuha oo laysku geeyey gaarayso 3.3-3.75 iyo in ardaygu uu dhamaystirto laba sano oo barashada luuqadaha aduunka ah ama inuu si hufan qoraal iyo hadalba u isticmaali karo luuqadahaas.

- Isbadal looga wareegayo xaalada hada jirta: Dhamaan maadooyinka waxaa dhibcahooda loo miisaami doonaa si isku mid ah marka celceliska dhibcaha maadooyinka ama GPA-da la qorayo (ma jiraan wax maamuus xushmadeed lagu bixiyaa) is la madrkaasna markii ay ardaydu soo qalin jabiyaan ardaydu ma jiraan cid si gooni ah loo muunaydoono oo aan ka ahayn ardayda kala gasha lambarka koowaad iyo lambarka labaad markii loo eego sida ay u kala sarayso celaliska dhibcuhu ama GPA-da
- Hindisaada:
  - Guusha ardaygu ka keeni karo waxaa lagu tijaabinayaa iyadoo ardayda la siiyo ayadoo ardayda la siiyo maadooyin adag isla markaasna waxaa aad loogu fiirsandoonaa sida ay uga soo guul gaaraan imtixaanada mustawaha la xiriira.
  - Ardayda waa in lagu dhiiri galiyaa inay maadooyinka ku doortaan ayagoo u eegaya cilmi ahaan siday ugu baahanyihiin iyo xiisaha ay maada kasta u hayn karaan ayagoo aan u eegayn maamuska ay ku helikaraan.
  - Habka maamuuska lagu qiimeeyo ee tacliintu wuxuu soo jeedinayaa in halkii maadooyinka oo dhan laga dhigalahaa in qaarkood kuwa adag oo tayadooda la kordhiyo.
  - Kuleejooyin lala xiriiray ayaa waxay cadeeyeen inaan jaritaanka dhibcaha maamuusku aanay waxba u dhimi doonin ama ka badalidoonin fursadaha arday loogu aqbali karo inuu waxbarashadiisa sii wato.

Faahfaahinta Qorshaha Hab Maamuuska Khaaska ah

- Ulajeedada: Ula jeedada arintaani waxaaweeyaan in lagu aqoonsado in ardayda soo qalinjabisa ayagoo guul wayn ka soo hooyey tacliinta ay maado walba (sida Ingiriisiga) iyo cashadradeeda gooni ahaan uga barteen ama dhowr maado oo si khaas ah laysugu barto sida maadada lagu magacaabo Information technology.
- Hab ka Dhexeeya Degmada oo Dhan oo Loogu Talagalay in Muqararka Qaybo ka Mid ah Maamuus Ardaydu ku Mutaystaan:
  A. Si Maamuus loo helo, waxaa ardayda looga baahanyahay inay dhamaystaan maadooyin aad u adag oo si ku tala gal aha la isugu xi-xijiyey oo tacliintii ay

qaadanayeen ka mid ah ama si khaas ah maadooyin dhowr arimood oo isku jir ah isku mar lagu baranayo ah.

B. Ardayd waxaa looga baahanyahay inay inay helaan celcelis ama GPA gaaraya marka dhibcaha maadooyinka oo dhan laysku wadaro 3.75 waana inay ka helaan maadooyinka maamuuska lagu bixiyo, waxay kale oo ardaydu u baahanyihiin inay dhamaystirtaan dhamaan maadooyinka soo socda oo dhan:

- Mashruuca Qalinjabinta ama waa inay la yimaadaan fayl muujinaya in ardaydu ama ardaygu si qoto dheer u fahamay maadooyinka laga rabo inay maamuuska ku mutaan.
- Waa inay ardaydu bulshada u adeegaan 100 saacadood iyo wax ka badan ayagoo qabanaya hawlo la xiriira maadooyinka laga rabo inay inay maamuuska ku mutaan.
- Waa inay ardaydu 100 saacadood iyo wax ka badan si mutadacnimo ah balse ay khibrad iyo aqoonsi ku kasbanayaan u shaqeeyaan.

- Maamuska iyo Qorshaha Lix Sano ah: Waa in ardaydu si caadi ah ugu dhawaaqaan inay niyada ku hayaan inay shaqadooda ka mira dhaliyaan si loogu aqoonsado maamuuska khaaska isla markaasna uu ku soo uruurinayo dhamaan barnaamijyada kala duwan ee ku baranayo inta lagu jiro Qorshaha Lixda Sano ah. Qorshaha Lixda Sano ah ee Dugsiyada Dadwaynaha ee St. Paul wuxuu ardayda u jeexayaa marin ay ku dhamaystiran karaan afar sano oo dugsi sare ah iyo ugu yaraan laba sano oo waxbarashada dugsiga sare ka saraysa ama shaqo xirfad heersare ah oo ay qabtaan markay qalinjabiyaan kadib. Gudoonka waxbarashadu wuxuu arintaan u qoondeeyey inay la bilaabato fasalada sanada 2008 isla markaasna dhamaan ardayda dugsiyada sare waxaa looga baahanyahay inay dhamaystaan Qorshaha Lixda Sano.
- Waxyaabaha lagu Abaal Mariyo Ardayda Dadaalka badan: Dugsiyada degmadu guud ahaan iyo gaar ahaanba waxay waxay la shaqayn doonaan kuleejooyinka iyo baayacmushtarka ka jira nawaaxiga ku si ay u abuuraan waxyaabo dhiiri galin u noqon kara inay ardaydu ku dadaalaan inay waxyaabo lagu maamuusayo helaan, sida in la kala dooransiiyo in shaqo la siiyo ama in ay kuleejada galaan oo loo ogolaado iyo in laga bixiyo kharashka waxbarashada kuleejada ee laba sano ama afar sano.

- Hindisaad:
  - habka loo dejinayo fikradaha muumuuska ardaydu higsanaysaa wuxuu ardayda hamiga sare leh ee aadka wax u yaqaana diirada u saarayaa maadooyin muhiim ah oo ay bartaan.
  - Ardaydu waxay maamuuska khaaska ah ku kasban karaan hadba sidda ay uga adkaadaan maaddooyinka ay la qaadanayaan kooxda ay dugsi ahaan ka tirsanyihiin.
  - Dajinta habmaamuuska khaaska ah ee wax barasho wuxuu macalimintaa ku dhiiri galinayaa inay maadooyinka ardaygu ka qaadanayo fasalada kala duwan

"is waafajiyaan" si ay taasi ardayda ugu horseedo cilmi qotto dheer iyo xirfad baahsan oo ay u yeeshaan manhajka ay baranayaan.

Fursadaha lagaga Doodikaro soo jeedinta Hab Maamuuska Khaaska ah iyo Shahaado Sharafta Ardayda.

- Feebarwari-April: Kulamo lagu falanqaynayo Dugsiyada Sare ayaa la qabandoonaa inta lagu jiro bilahaan.
- Maarso: Waxaa jiridoona xogwaraysi Shabakada lagula yeesho shaqaalaha, waxaana la qabandoonaa gudi arimahaan ka dooda.
- Abriil: Gudiga ka baaraandega arimahaan oo dhan ee degmada ayaa kulan yeelandoona
- Meey: Gudiga Kormeerka Waxbarashada ayaa waxay samayndoonaan soo jeedintii ugu dambaysay.